Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya
Golaha Shacabka
Guddiga Arrimaha Dibadda &
Iskaashiga Caalamiga

جمهورية الصومال الفيدرالية
مجلس الشعب
لجنة شؤون الخارجية والتعاون الدولي

Federal Republic of Somal
House of the People
Committee on Foreign Affairs & International Relation

Tix: GSHS/GAD/28/2025:الرقم

Date:18/10/2025:التاريخ

Ku: Guddoomiyaha Golaha Shacabka
L/H Golaha Shacabka BJFS

**Ujeedo: Soo Gudbin Warbixinta Akhrinta 3aad & U Codeynta Heshiiska Aagga Ganacsiga Xorta Ah ee Qaaradda Afrika (AfCFTA)**

**Mudane Guddoomiye iyo Mudanayaasha Xubnaha Sharafta Leh,**

Guddiga Arrimaha Dibadda iyo Iskaashiga Caalamiga ah ee Golaha Shacabka, asagoo gudanaya waajibaadkiisa dastuuriga ah si waafaqsan Qodobka 50aad faqradiisa 8aad Xarafkiisa (b) ee Xeer-hoosaadka Golaha Shacabka, isla markaana tixgelinaya talada **Guddiga Dhaqaalaha, Ganacsiga, Warshadaha iyo Maalgashiga ee Golaha Shacabka** si waafaqsan Qodobka 110aad faqradiisa 4aad, waxa uu Golaha Shacabka horkeenayaa heshiiskan muhiimka u ah kobcinta dhaqaalaha iyo ganacsiga dalka.

Guddigu wuxuu golaha la wadaagayaa warbixintan ku saabsan Heshiiska Aagga Ganacsiga Xorta ah ee Qaaradda Afrika (AfCFTA) isagoo dulmar kooban ka bixinaya ujeedooyinka, faa'iidooyinka, iyo baahida loo qabo ansixinta heshiiskan

## 1. Heshiiska Aagga Ganacsiga Xorta ah ee Qaaradda Afrika (AfCFTA)

**Ujeedada Heshiiska**:

Waa hindise loo sameeyey in la abuuro suuq mideysan oo badeecooyinka iyo adeegyada ah, si loo yareeyo caqabadaha ganacsi, korna loogu qaado isku xirnaanta wax kala iibsiga guud ahaan wadamada Afrika iyo **Iskaashi dhanka maalgashiga, hal-abuurka, iyo isu socodka dadka.**

- **Xubnaha**: Heshiiska AfCFTA waxaa saxiixay 54 ka mid ah 55-ka dal ee xubnaha ka ah Midowga Afrika, waxaana si rasmi ah u ansixiyey 49 dal. Soomaaliya waxay mid ka mid tahay 6 dal ee saxiixay, laakin aanan baarlaamadoodu ansixinin.

Tell: +252-612710000
E-mail. foreignaffairs.committee@parliament.gov.so
Website: http://www.parliament.gov.so

**Warbixin ka jawabid suaalihii iyo firkadihiii ay dhiibteen Mudanyaasha golaha shacabka ee Akhrintii labaad.**

**Habka hergelinta gudaha Heshiiska AfCFTA ka dib Markii la Saxiixo (Domestication Process)**

Marka dal uu saxiixo oo uu ansixiyo heshiiska **African Continental Free Trade Area (AfCFTA)**, waxa uu aqbalaa heshiiska heer caalami. Si uu heshiiskaasi uga shaqeeyo gudaha dalka, waa in laga hergeliya **gudaha (domestication)**, taas oo micnaheedu yahay in lagu jaangooyo sharciyo, siyaasado iyo nidaamyo qaran. Habkani waxa uu ka kooban yahay:

- **Ansixinta Baarlamaanka**: Baarlamaanka ayaa ansixinaayo heshiiska si looga hergeliyo dalka.
- **Isku hagaajinta siyaasadaha**: Siyaasadaha ganacsiga, kastamka, canshuuraha iyo warshadaha ayaa lagu hagaajiyaa si ay ula jaanqaadaan heshiiska AfCFTA.
- **Dhismaha hay'adaha**: Waxaa dhismaaya hay,ado dowladeed oo hada somaliya an u dhisneen si ay u gutaan waajibaadkooda sida, (**Hay,ada Dhiiragelinta Dhoofka, Hay,ada Tartanka Xorta ah iyo Ilaalinta Macaamiisha, Hay,ada ilaalinta hanti maskaxeedka, Hay,ada Dhiiragelinta Maalgashiga iyo kuwa kale oo badan**) hay,adahan waxa ay abuurayan habraacyo lagu fuliyo xeerarka AfCFTA.
- **Dib u habaynta sharciyada**: Jadwalka cashuuraha, sharciyada tartanka, xuquuqda hal-abuurka, iyo xeerarka maalgelinta ayaa la waafajinayaa.
- **Wacyigelin iyo tababar joogtaah**: Ganacsatada, SMEs, iyo hay'adaha dowladda ayaa lagu tababaraa fursadaha cusub iyo xeerarka

## Taageerada Farsamo ee AfCFTA ay siineysa Soomaaliya ka dib ansixinta heshiiska

1. Taageero Sharci iyo Siyaasadeed

- Ka caawinta Soomaaliya in ay **Heshiiska AfCFTA ku dhexgeliso sharciyada iyo siyaasadaha qaranka**.
- Bixinta **talo sharciyeed iyo khibrad** ku saabsan heshiisyada ku lifaaqan (adeegyada, maalgelinta, xuquuqda hal-abuurka, tartanka, iyo ganacsiga dhijitaalka ah).
- Soo jeedinta **xeer-hoosaadyo iyo tilmaamo sharciyeed** si loo waafajiyo nidaamka ganacsiga gudaha Soomaaliya iyo kan AfCFTA.

2. Dhisidda Aqoonta iyo Tababarka

- Tababarka **masuuliyiinta dowladda, kastamka, iyo saraakiisha ganacsiga** si ay si buuxda u fahmaan hirgelinta AfCFTA.

- Dhisidda awoodda **ganacsatada Soomaaliyeed, SMEs, haweenka iyo dhalinyarada** si ay uga faa'iidaystaan suuqyada Afrika.
- Abaabulka **siminaaro, aqoon isweydaarsi iyo safarro waxbarasho** oo lagu baranayo khibradaha dalalka kale ee horey u hirgeliyay.

### 3. Taageero Dhanka Cashuuraha iyo Kastamka

- Caawinta Soomaaliya si loo diyaariyo loona hirgeliyo **jadwalka cashuuraha** ee AfCFTA.
- Bixinta **talo farsamo oo ku saabsan Xeerarka Asalka (Rules of Origin)** si badeecooyinka Soomaaliyeed ugu qalmaan mudnaanta AfCFTA.
- Taageeridda **casriyeynta kastamka iyo nidaamka e-customs** si loo dedejiyo ganacsiga xuduudaha.
- Ka caawinta Soomaaliya in ay ka faa'iidaysato qalabka uu AfCFTA diyaariyey sida **AfCFTA e-Tariff Book** iyo **RoO Manual**.

### 4. Daraasado, Xog iyo Kormeer

- Bixinta **xogta ganacsiga iyo cilmi-baarista** si Soomaaliya u qaabeyso siyaasado ganacsi oo xog ku dhisan.
- Taageeridda Soomaaliya in ay sameyso **qiimeyn saameyn (impact assessment)** si loo fahmo sida AfCFTA u saameynayo warshadaha gudaha.
- Kaalmeynta hirgelinta **PAPSS (Pan-African Payment and Settlement System)** si lacagaha gudaha loogu isticmaalo ganacsiga Afrika gudihiisa.

### 5. La Shaqeynta Ganacsatada iyo Daneeyayaasha

- Taageero gaar ah oo loo fidiyo **SMEs Soomaaliyeed** si ay u helaan suuqyo cusub oo Afrika ah.
- Dhiirigelinta **Ururada ganacsiga Soomaaliyeed iyo Guddiga Qaranka ee Hirgelinta AfCFTA (NIC)** in ay helaan talo iyo tababar joogto ah.
- Sameynta **wacyigelin iyo ololeyaal xog bixin** si ganacsatada iyo bulshada Soomaaliyeed loo baro fursadaha ka jira AfCFTA.

Heshiiska Suuqa Ganacsiga Xorta ah ee Qaaradda Afrika (AfCFTA) wuxuu dalkeena u furaa **fursad weyn oo ganacsi, maalgashi iyo horumar dhaqaale**. Ka dib marka la ansixiyo, waxaa muhiim ah in heshiiska gudaha laga hergeliyo si sharciyo, siyaasado iyo nidaamyo qaran loogu waafajiyo, Ansixinta waa ballan-qaad siyaasadeed; gudaha gelintu ama ka hergelinta (domestication) waa sida loo dhaqan geliyo heshiiska gudaha dalka.

Hirgelinta AfCFTA waxay u horseedaysaa dalkeena suuq ballaaran oo ka badan **1.4 bilyan qof, fududeynta ganacsiga, koboca warshadaha, soo jiidashada maalgashiga, iyo shaqo abuur dhallinyarada iyo bulshada**.

Dhanka kale, AfCFTA waxa uu si cad u dhigaya in cashuuraha badeecadaha la yareeyo si tartiib tartiib ah, hase yeeshee **waxaa jira hannaan ilaalinaya warshadaha gudaha. Waxaa lagu ilaaliyaa badeecadaha xasaasiga ah iyo kuwa ka-reebista ah, iyadoo la adeegsanayo xeerarka asalka si looga hortago badeecooyin shisheeye oo suuqa lagu soo qubo. Waxaa kale oo jira tallaabooyin ilaalin ah (safeguards) iyo xeelado ka hortagaya qubista suuqyada (anti-dumping) haddii badeecooyinka shisheeye ay khatar ku noqdaan warshadaha gudaha**. Dowladda ayaa intaas dheer adeegsan karta siyaasadaha horumarinta warshadaha, oo ay ku jiraan tababar xirfadeed, horumarinta kaabayaasha dhaqaalaha iyo taageerada SMEs.

**Sido kale , AfCFTA wuxuu ku dhisan yahay hannaan ilaalinaya warshadaha gudaha. Waxaa jira liisyo badeecooyin xasaasi ah iyo ka-reebidyo gaar ah, xeerarka asalka si looga hortago badeecooyin shisheeye oo suuqa lagu soo qubo, iyo tallaabooyin ilaalin ah haddii khatar loo arko. Dowladda ayaa sidoo kale xaq u leh inay isku darto siyaasadda cashuuraha iyo horumarinta warshadaha gudaha si ay u tartamaan suuqa cusub**

Haddaba, hirgelinta AfCFTA waa tallaabo istaraatiiji ah oo aan ka faa'iidi karno si aan u horumarino dhaqaalaha, u xoojino warshadaha gudaha, isla markaana aan bulshada u abuurno fursado shaqo iyo horumar waara.

**Faa'iidooyinka hergelinta gudaha AfCFTA**

Marka AfCFTA la dhaqan geliyo gudaha, waxa uu keenaa faa'iidooyin badan oo ay ka mid yihiin:

- **Suuq Ballaaran**: Helitaanka suuq ka badan 1.4 bilyan oo qof oo Afrikaan ah.
- **Sahlidda Ganacsiga**: Kastamyada oo fududaada iyo caqabadaha aan cashuurta ahayn oo yaraada.
- **Maalgelin soo jiidasho leh**: Nidaamka ganacsi oo mideysan wuxuu kordhiyaa kalsoonida maalgashadayaasha.
- **Kobaca Warshadaha**: Fursado cusub oo warshado gudaha ahi uga dhoofaan suuqyo kale oo Afrika ah.
- **Shaqo Abuurid**: Warshado iyo dhoofin cusub oo abuura shaqooyin.
- **Faa'iidooyinka Macaamiisha**: Badeecooyin badan oo kala duwan iyo qiimo tartan leh.

**Dhisid guddiga Qaranka ee Hirgelinta AfCFTA**

Dal kasta wuxuu sameeyaa ama dhisaayaa **Guddiga Hirgelinta Qaranka (NIC) heshiiska** gudigaas oo qaadanaayo masuuliyada hergelinta isku duwida fulinta heshiiska AfCFTA.

Tell: +252-612710000
E-mail. foreignaffairs.committee@parliament.gov.so
Website: http://www.parliament.gov.so

Gudiga wuxuu u xilsaaranyahay wada xaajoodka heshiiska, gudiga wuxu leeyahay door muhiim ah oo ay ka mid yihiin **isku-dubbaridka siyaasadaha, wadaxaajoodka danaha qaranka, la-tashiga daneeyayaasha Ganacsiyada gaarka loo leeyahay iyo bulshada, iyo wacyigelinta ganacsatada si ay uga faa'iideystaan heshiiskan**.

Haddaba, **hirgelinta AfCFTA waa tallaabo istaraatiiji ah oo horseedi karta koboc dhaqaale iyo mid warshadeed**, iyadoo la hubinayo in warshadaha gudaha aan la dayacin balse la xoojiyo si ay uga faa'iideystaan suuq weyn oo Afrika isku xiran.

**Doorka Guddiga Qaranka ee Hirgelinta AfCFTA**

Dal kasta wuxuu sameeyaa ama dhisaayaa **Guddiga Hirgelinta Qaranka (NIC) heshiiska** si uu u kormeero, iskuna duwo fulinta AfCFTA. Doorkiisu waxaa ka mid ah:

- **Taageero wadaxaajood**: Bixinta talo farsamo oo ku saabsan wadaxaajoodka socda (xeerarka asalka, adeegyada, ganacsiga dhijitaalka ah).
- **In uu wada-hadal ka galo** waxyaabha danta u ah dalka iyo in ay dib u dhigan karaan waxwalba ay u arkaan in uu dhib ku yahay dalka,
- **Isku dubbarid siyaasadeed**: Hubinta in dhammaan wasaaradaha (Ganacsiga, Maaliyadda, Kastamka, Gaadiidka, Warshadaha) ay is waafaqaan.
- **La tashiga daneeyayaasha**: La shaqaynta ganacsatada gaarka loo leeyahay, iskaashatooyinka, haweenka iyo dhalinyarada, iyo ururada ganacsiga.
- **La socod iyo qiimayn**: Daba-galka fulinta, warbixinta caqabadaha iyo soo jeedinta xalalka.
- **Wacyigelin**: Ganacsatada lagu baraarujiyo fursadaha dhoofinta iyo shuruucda la raacayo.

**Gudiga waxaa uu ka koobnaan doonaa**

- Wasaarada Ganacsiga iyo Warshadaha Chair
- Wasaarada Maaliyada (Customs and revenue)
- Wasaarada Arimaha Dibida iyo Iskaashiga Caalamiga
- Wasaarada Qorsheynta Maalgashiga, horumarinta dhaqaalaha
- Wasaarada Dekadaha iyo Gaadiidka badda
- Wasaarada Gaadiidka Duulista Hawada
- Wasaarada Beeraha
- Wasaarada Kaluumeysiga
- Wasaarada Xanaanada Xoolaha
- Wasaarada Shaqada iyo Arimaha Bulshada
- Wasaarada Teknolojiyada iyo Xiriirka
- Hay,ada Tayo Dhowrka (SoBS)
- Hay,ada Tirikoobka (Statistics)
- Rugta Ganacsiga iyo Warshadaha
- Ururka shaqaalaha (Trade Union)

**Cashuuraha (Tariffs) iyo Ilaalinta waxsoosaarka iyo Warshadaha Gudaha**

AfCFTA wuxuu dhigaya in dalalka Afrika ay si tartiib tartiib ah u yareeyaan cashuuraha ku saabsan **badeecadaha**. Si kastaba ha ahaatee, waxaa jira habab lagu ilaaliyo qaybaha nugul(protection of locsl industries):

- **Liiska Badeecadaha Xasaasiga ah (7%)**: Dalalka waxay dib u dhigaan furitaanka badeecadaha qaarkood si tartiib tartiib ah loogu yareeyo cashuurta.
- **Liiska Ka Reebidda (3%)**: Qaar ka mid ah badeecadaha waxaa si joogto ah looga reebi karaa dhimista cashuuraha si loo ilaaliyo warshadaha muhiimka ah.
- **Xeerarka Asalka**: Kaliya badeecadaha dhab ahaantii Afrika laga soo saaray ayaa ka faa'iideysan kara mudnaanta AfCFTA, si looga hortago badeecooyin shisheeye oo lagu soo qubo suuqa.
- **Xeeladaha Ilaalinta Ganacsiga**: Waxaa la isticmaali karaa tallaabooyin ilaalin ah (safeguards), ka hortagga qubista (anti-dumping), iyo cashuur celin haddii badeecooyin shisheeye ay khatar ku noqdaan warshadaha gudaha.
- **Taageerada Siyaasadda Warshadaha**: Dowladda waxay isku dari kartaa ilaalinta cashuuraha iyo horumarinta warshadaha (tababar xirfadeed, kaabayaasha dhaqaalaha, taageerada SMEs).

Tani waxay xaqiijinaysaa in inkastoo la furayo ganacsiga, haddana **warshadaha gudaha aan la burburin ee la taageero si ay u tartamaan**.

**Gunaanud**

Suaalihii ay na weydiiyeen Munayaasha barlamaanka dhamaantood **waxaa ay ahaayeen howla farsama ee la xiriirta fulinta heshiiskan taasna waxaa u xilsaarnaan doona gudiga la dhisi doona marka ay ansixiyaan heshiiskaan.**

Hadaba Guddigu wuxuu dib u eegis qoto dheer ku sameeyey heshiiskan, wuxuuna garwaaqsaday in uu la jaanqaadayo Dastuurka KMG, diinta Islaamka, iyo shuruucda dalka u yaalla. Sidaa darteed, **Guddigu wuxuu Xubnaha Golaha Shacabka ka codsanayaa in si buuxda loo ansixiyo heshiiskan, iyadoo laga duulayo danaha qaranka, fursadaha dhaqaale, iyo doorka Soomaaliya ee iskaashiga goboleed iyo mid qaraadeed.**

**Mahadsanidiin**

**Xil. Aweys Hussein Mo'alim**

**Guddoomiye K/X Guddiga Arrimaha Dibadda**

**iyo Iskaashiga Caalamiga**

**Tell: +252-612710000**
**E-mail.** foreignaffairs.committee@parliament.gov.so
**Website:** http://www.parliament.gov.so